



VICTORIA POLICE

WAXA BOOLIISKU YIRAAHDO

Booliisku waxay adeegsan karaan oraahyada sida 'waayitaan aan-shaki-lahayn' ama 'dhimasho aan-shaki-lahayn'. Oraahyadaas waxay la macno noqon karaan in qofka aad raadinayso inuusan u maqnayn sabab dambi jariimo ah. Sababta qofku u maqan yahay waxay ahaan kartaa midaan la sheegin ilaa la helo caddayn si loo sharxo sababta waayitaanka.



VICTORIA POLICE-KAAGA

- Haddii aad garanayso halka laga helo qof kaas oo la soo sheegay inuu maqan yahay, ama aad ka hayso wax macluumaad ah oo ku saabsan qof maqan, ka wac Crime Stoppers taleefanka **1800 333 000**.
- Victoria Police waxay bixiyaan adeegga bulshada oo lacag la'aan ah.
- Caawimaadda Victoria Police waxaa la helaa 24 saac maalintii, todabada beri ee asbuuca.
- Booliiska Victoria waxay ku labistaan yunifoomka buluugga ah ama dhar cad.
- Xubnaha dadweynaha waxay iman karaan saldhigyada booliiska si ay u soo sheegaan dhacdooyinka ama talooyin codsadaan.
- Victoria Police waxay bixiyaan turjumaano, halkay ku habboon tahay.
- Cinwaanada iyo lambarada taleefannada ee saldhigyada booliiska deegaanka waxaa laga heli karaa www.police.vic.gov.au.



VICTORIA POLICE

www.police.vic.gov.au



SOO-SHEEGIDDA QOFKA MAQAN

KA-HELIDDA CAAWIMAAD
BOOLIISKA HADDII CID AAD
TAQAANO AAN LA HELI KARIN

Haddaad ka walwalsan tahay wax ku saabsan ammaanka qofkaas oo aadan heli karin, waxaad u sheegi kartaa inuu maqan yahay booliiska degaankaaga adigoo sameeya waxa loo yaqaan 'warbixinta qofka maqan'.

MAAHAN INAAD SUGTO 24 SAAC SI AAD U SOO SHEEGTO QOF MAQAN.

ISLA MARKIIBA WAAD SOO SHEEGI
KARTAA QOFKAAS MAQAN.



SIDA LOO SAMEEYO WARBIXINTA QOFKA MAQAN

Si loo soo sheego in qof maqan yahay, imow saldhiga booliiska degaankaaga.

BOOLIISKU WAXAY KU WEYDIIN DOONAAN SU'AALAHA SOO SOCDA:

- Sidee u e'g yahay qofka maqani?
- Qofkaas ma qabey waxuun aan caadi ahayn oo ku saabsan siday u muuqdaan?
- Ma haysaa sawir dhawaan ah ee qofka maqan?
- Halkee ama goorma ayaa ugu dambeysey in la arkay ama la maqlay qofkaas?
- Ma jiraan meelo qofka maqan uu badanaa booqdo?
- Qofkaas ma qabey wax dhibaatooyin caafimaad ah mase u baahnaa daaweyn?
- Waa maxay magacyada iyo lambarada xiriirka ee qaraabada ama saaxiibada uu lahaa qofkaasi?
- Qofka maqan ma ku hadli karaa Ingiriisiga?



MA U BAAHAN TAHAY CAAWIMAAD SI AAD WARBIXIN U SAMAYSO?

Halkay suurtagal tahayba, waxaad codsan kartaa joogitaanka sarkaal kula jinsi ah markaad samaynaysa warbixintan?

Booliisku waxay ku weydiin doonaan magacaaga iyo cinwaankaaga si ay kaala soo xiriiraan wax ku saabsan qofka maqan.

Haddii uusan Ingiriisiga ahayn luqaddaada kowaad, booliiska ayaa kuu keenaya turjumaanka taleefoonka oo xirfad-yaqaan ah si uu kaaga caawiyo inaad samayso warbixintan. Taasi waa adeeg lacag la'aan ah. Turjumaanka taleefanka wuxuu kaloo kugu caawin karaa inaad fahamto oraahyada gaarood oo uu booliisku adeegsado. Turjumaanka xirfad-yaqaanka ah ee goobta jooga (fool-ka-fool) ayaa kaloo lagu keeni karaa haddii loo baahdo, si kastaba ha ahaatee, tani waa adeeg hore loo diyaariyey ee isla taariikhdaas iyo waqtigaas ku habboon qaybaha oo dhan booliiska, turjumaanka iyo qofka warbixinta samaynaya.

GOORMA AYAA QOFKA LOO QAADAN KARAA INUU 'MAQAN' YAHAY.

QOFKA WAA MAQAN YAHAY MARKII:

- Loo soo sheego booliiska oo meel ay ku sugan yihiin aan la aqoon; iyo
- Markay jiraan cabsiyo la xiriira ammaanka ama daryeelka qofkaas.

